**Xeer M. J. 14 Feberaayo 1958, lamba. 1011 diw.**

**Oggolaanshaha (Ansixinta) xeer-nidaamiyaha xaraashidda iyo bixinta magdhowyada ku xusan faqradda 2, xarafka b), ee Lifaaqa A, ee Mucaahadada talyaaniga iyo Ingiriiska, ee 20 Maarso, oo la xiriirta Soomaaliya, oo lagu fuliyey sharciga 30$^{ka}$ Juunyo 1954, lamba. 677.**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

Markuu arkay Qod. 87aad, ee Dastuurka;

Markuu arkay sharciga 30$^{ka}$ Juunyo 1954, lamba. 677, ee oggolaanshaha iyo hirgelinta Mucaahadada dhermartay Xukuumadda Talyaaniga iyo Xukuumadda Ingiriiska iyo Waqooyiga Ayrlaand, oo ku saabsan axkaamta leh dabeecad lacageed iyo dhaqaale oo tixraacaya wareejinta soomaaliya lagu wareejiyey Maamulka Wasaayafa Talyaaniga, oo lagu guntay (ebyey/galay), ayada la isdhaafsanayo warqado ogoolaansho. 20 Maarso 1950;

Markuu dhegeystay ráyiga Golaga Dowladda;

Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;

Asagoo ka Duulaya Soojeedinta Wasiirka Arrimaha Dibedda, uuna la ogyahay Wasiirka Keydka Lacagta;

Wuxuu Xeerinayaa:

**Qod. 1**

Waxaa la oggolaaday nidaamka xagga ku-kala-baxa iyo bixinta magdhowyada ku xusan faqradda 2aad, xarafka b, ee lifaaqa A oo ku lifaaqan Xeerkan, ee uu arag-oggolaaday Wasiirka Arrimaha Dibedda.

**Qod. 2**

Magdhowyada ay jideynayso faqradda 2aad, xarafka b), ee lifaaqa A oo ku lifaaqan Mucaahadada talyaani- ingiriis oo ku tilmaaman Qod. 1aad waxay saaran yihiin oo laga bixinayaa qoondaha ah Liire 1,000.000.000 oo ku qoran miisaaniyadda ku-talagalka kharashka Wasaaradda Arrimaha Dibedda,taas oo ku aaddan madaxa 117-marcelis xagga sanadka maaliyadda ee 1954-55, oo ku beegan madaxa 164, oo lagu kordhiyey sanadka maaliyadda 1957-1958 magacdhowga “Lacagta loo baahan yahay in lagu baxsho kharashaadka ku xusan lifaaqa A, faqradda 2, xarafka b, oo ku lifaaqan Mucaahadada, ee Mucaahadada dhexmartay Xukuumadda Talyaaniga iyo Xukuumadda Midowga Ingiriiska iyo Waqooyiga Ayrland oo ku saabsan axkaamta leh dabeecad lacageed iyo dhaqaale oo tixraacaysa wareejinta soomaaliya lagu wareejiyey Talyaaniga, oo lagu ansixiyey sharciga 3o Juunyo 1954, lamba. .677”.

**Qod. 3**

Xeerkanani waxa uu dhaqangelayaa maalinta xigta maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Talyaaniga.

Xeerkan oo len shaabadda Dowladda, waxaa la dhex gelinayaa Ururinta rasmiga ah ee sharciyada iyo xeerarka Jamhuuriyadda Talyaaniga.

Cid kasta oo mas'uul ka ah waxaa waajib ku ah inay dhowrto, kuna ilaaliso.

Lagu bixiyay Rome, 14 Febraayo, 1958.

**GRONCHI**

**ZOLI- PELLA – MEDICI**

Waxaa arkay Diiwaanhayaha: **GONELLA**

Laga diiwaangeliyey Maxkamadda Xisaabaadka

Maanta 17 Noofember 1958.

Qoraallada Dowladda, diiwaan lamba. 115, Xaashi lamba. 5.

**XEER-NIDAAMIYE LOOGU TALAGALAY NAQDI (CADDAAN) KA-DHIGISTA IYO BIXINTA MAGDHOWYADA AY DHIGEYSO FAQRADDA 2AAD, XARAFKA B), EE KU LIFAAQAN MUCAAHADADA TAYAANI - INGIRIIS, EE 20 MAARSO 1950, OO KU SAABSAN SOOMAALIYA, OO LAGU FULIYEY SHARCIGA 30 JUUNYO 1954, lamba. 677.**

**Qod. 1**

Magdhowga ku xusan faqradda 2aad, xarafka A, ee Mucaahadada lagu guntay London 20kii Maarso 1950, xagga dalabaadka aysan sheegin masuuliinta Ingiriiska, oo ku cabbiran qiimaha ganacsi oo ay badeecooyinka lahaayeen suuqa goortii ay dhacayee dhacdooyinka ama la fuliyey falalka uu ka dhashay Magdhowga qudhiisa oo lagu cabbiray (sheegay) lacagta ka socotay meesha waqtigaas, oo ku saabsan dhacdooyinka soo socda iyo falalka dhacay, ama laga fuliyey gudaha dhulka Soomaaliya oo hadda waqtigaan lagu aaminay Maamulka Wasaayada Talyaaniga ama sí kasta oo ay xaaladdu noqoto, waxyeello ka soo gaareen dadka hadda deggan halkaas, inta u dhexeysa Febraayo 28, 1941 illaa 31 Maarso, 1950:

a) La-wareegidda ku meel gaarka, ee hanti guurto iyo maguurto ah oo loogu talagalay adeegyada rayidka ama militari, oo ay fuliyeen ciidamada qalabka sida ama masuuliinta Xukuumadda Ingiriiska ama ciidamada iyo masuuliita quwadaha isbahaystay ama isu uruursaday gudaha Soomaaliya;
b) Waxyeellooyin (khasaare) degdeg ah oo toos ah oo loo geysto hantida lala wareegay;
c) Waxyeellooyin degdeg iyo toos ah oo ay hanti gaar u-geesteen ficillo aan ahayn ficillo dagaal, oo ula-kac ama kamá ah, ee ciidama qalabka sida ama masuuliin, ama maliishiyaad hoos yimaada amaba ayaga la shaqeeya; waxyeellooyin loo geystay dadka oo ay sababeen baabuurta isla ciidamada ama masuuliinta;
d) Adeegyada iyo sahay-u-siinta badeecooyinka ee lagu fuliyay amar ka soo baxay ciidamada iyo masuuliinta horey la soo sheegay;
e) Kirooyinka hantida ma guurtada ah, ee ay ciidama ama masuulinta kor lagu soo sheegay ugu talagaleen adeegyada madaniga ama militariga oo aan la bixin ilaa 31ka Maarso 1950;
f) Qabashada iyo la-wareegida badeecooyin ito alaab, gaadiidka iyo maraakiibta ay ku shaqeeyaan ciidamada ama masuuliinta aan soo sheegnay xagga habsami u-shaqaynta adeegyada madaniga ama militari, ama ayagaas ogolaadeen.

Bixinta magdhowga, oo lagu fuliyay lire Talyaani ah iyadoo lagu saleynayo sicirka sarrifka rasmiga ah oo jiray goorta falalkaas la sameeye ama dhacdooyinku ay dheceen, waxaa lagu fulinayaa hababka uu dhigayo Xeer-nidaamiyahaan.

**Qod. 2**

Codsiyada magdhowga ah, waxaa lagu hagaajinayaaee Wasaaradda Arrimaha Dibadda, waa in ay gaaraan Maamulka Wasaayada Talyaaniga ee Soomaaliya (AFIS) ee Muqdisho ama xafiisyada (fadhiyada) Gobollada ama Degmooyinka, muddo 90 maalmood gudahood laga bilaabo daabacaadda Xeernidaamiyahaan lagu daabaco (nashriyo) Faafinta Rasmiga ah,ee Maamulka Wasaayada Talyaaniga, ee Soomaaliya.

Dadka xaqa u leh oo hadda ku nool Itaaliya, ama dibedda Soomaaliya, waxa ay soo gudbin codsiyada (araajida) ku xusan faqradda hore u gudbin karaan, sagaashan maalmood gudahood laga bilaabo daabacaadda xeer-nidaamiyahaan lagu nashriyo Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Talyaaniga, Wasaaradda Arrimaha Dibadda - Agaasinka Guud Soomaaliya Roma, ama xafiisyada diblomaasiyadeed iyo qunsuliyadeed, ee talyaaniga dibaddisa, kuwaas oo ku dhaqaaqaya u-gudbinta maamulka Wasaayada ah ee kor lagu soo sheegay.

Codsiyada waa in la soo gudbiyaa ayaga midkiiba saddex nuqul yahay, oo ay ku lifaaqan yihiin dukumintiyada daliilka u ah, nuqul asal ah ama nootaaye sharciyeeyey. Hal oo ka mida codsiga nuqul,, oo leh shaabadda xafiiska qabtay iyo taariikhda la qabtay, waxaa loo celinaya qofka daneynaya.

Codsiyada loo gudbiyey mas'uuliyiinta Ingiriiska ee Soomaaliya fadhiya ka hor 31-kii Maarso, 1950 iyo Maamulka Wasaayada Talyaaniga ee Soomaaliya ka hor inta uusan dhaqangelin Xeernidaamiyahan, waa in loo sharciyeeyaa iyadoo la raacayo habraacyada ku xusan Qod. soo socda.

**Qod. 3**

Codsiyada ku xusan qodobka. 2aad, waa in ay ku jirto tilmaan faahfaahsan oo ku saabsan inta ay ka kooban tahay dulucda magdhowga, sida uu qabo qodobka. 1aad, iyadoo ay la socoto (wehliso) tilmaanta culeysyada dhaqaale iyo canshuuraha saaran, iyo sidoo kale tilmaamida sababta iyo lacagta la codsaday marka la barbardhigo qiimaha suuqa iyadoo la racayo habraacyada (qaababka) ku xusan Qod. 1aad, waana in ay la socdaa dukumiintiyada soo socda:

a) cadeynta daneeyaha oo ay ka muuqato lacagta magdhow ahaanta loo bixiyey, oo la xiriirta dhacdooyinka ama falalka ku tixan Qod. 1aad. Haddii ay dhacdo in aan la bixin wax magdhow ah, daneeyhu waa in uu raaciyo caddeyn sugeysa (caddeyneysa) xaaladdan.

Marka ay arrintu tahay dhaxal, dhaxal-sugayaashu (dhaxlayaashu) waa in ay muujiyaan sifahaas iyo xaqa uu mid kasta leeyahay, ayaga oo keenaya aqoonsiyo uu bixiyey xafiiska dad-qorista ama notaaye.

Daneeyuhur, wuxuu kaloo, keenayaa (soo-qaddimayaa) dokumenti kasta, oo kale, oo caddeynaya dhacdada dhalisay magdhawga, iyo sidoo kale, lahaanshaha waxa ay ka kooban tahay dulucda magdhawga laftiisa, iyadoo laga digayo in, haddii hantida ama xaqa uu yahay saami qaybsaneyn oo ay wada leeyihiin dhowr qof, codsiga ku xusan Qod. 2aad, waxaa geyn (qaddimi) kara mid ayagaas ka mida, dantiisa iyo danta dad kale oo xaqa wax ku leh awgeed;

b) Xagga shirkadaha sí sharci ah loo dhisay (aasaasay), caddeymaha ay bixiyeen masuuliinta awooda u leh iyadoo la raacayo nidaamka sharciga ee meesha ay ku taal xarunta sharciga ah, oo caddaynaya nooca shirkadda ayna ku cad-yihiin tilmaamaha lagama maanka ah, geynta qoraalka lagu dhisay (aasaasay) iyo, haddii uu jiro, Xeerka, iyo weliba wixii wax-ka-beddello dambe ah;

c) Shakhsiyaadka kale, qaanuuneed, nuqul ka mid ah qoraallada loogu aqoonsaday shakhsiyadda qaanuuneed;

d) Shirkadaha ama ururada aan sí dhab ah loo dhisin, dukumiintiyo u qalma ayada oo la raacayo nidaamka sharci oo ka jira meesha (goobta) ay ku taal xarunta (xafiiska) sharciga, oo muujinaya hawsha la qabtay goorta ay dhacday dhacdada dhalisay magdhowga.

**Qod. 4**

Maamulka Wasaayadda Talyaanigu ee Soomaaliya (AFIS) ayaa u xilsaaran in uu fuliyo, xagga iyo magaca Dowladda Talyaaniga, iyadoo adeegsanaysa Guddi gaar ah oo lagu magacaabayo Xeerka Wasiirka Arrimaha Dibadda, ku saleysan soojeedinta Maamulaha, hubinta iyo qiimeynta magdhawyada lagy leeyahay sharciga 30 Juun 1954, lamba. 677.

Guddiga ku xusan faqradda hore wuxuu ka kooban yahay:

— Hal garsoore ka tirsan garsoorka oo isagu guddoominaya;

— Afar hawlwadeen oo laga soo dhex xuli shaqaalaha ku xusan Qod. 1aad, xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda, ee 9 Disember1952, n. 2359, oo ku saabsan sharciga (nidaamka) shaqaalaha Dawladda Talyaaniga ee ka shaqeeya A.F.I.S, oo saddex ka mid ah loo xilsaaray adeegyada farsamo iyo maaliyadeed iyo midna adeegyada hab-xisaabeedka.

Guddigu waxa uu go'aan ku gaarayaa cod aqlabiyad ah. Hawlaha xoghaynta waxaa fulinaya qof karaani ah oo laga soo dhex doorto shaqaalaha ku xusan Qod. 1aad, ee xeerka kor lagu soo sheegnay.

**Qod. 5**

Guddigu wuxuu awood u leeyahay in uu amro sahmin, qiyaasid, xaqiijimo iyo baaritaanno, isagoo adeegsanaya xubno iyo khubaro ka tirsan Maamulka Wasaayada Talyaaniga ee Soomaaliya (A.F.I.S) iyo in uu dalbo dukumiinti dheeri ah si loo hubiyo jiritaanka shuruudaha loo dejiyey sí loo helo magdhow.

**Qod. 6**

Go'aanka Guddiga oo xambaarsan soo-jeedinta wax-bixinta waxaa la ogeysiinaya dhinacyada daneynaya, ayada oo loo marayo madaxda degmooyinka, haddii ay deggan-yihiin Soomaaliya iyo masuuliinta awoodda u leh haddii ay deggan yihiin Talyaaniga ama dibedda.

Dhinacyada daneynaya waxay rafcaan kag soo-horjeedaa góaanka Guddiga u qaadan karaan Wasiirka Arrimaha Dibadda, sagaashan maalmood gudahood laga soo bilaabo taariikhda ogeysiiska.

Soo-jeedinta Guddiga, oo ay weheliyaan (la socdaan) dukumiintiyada la xiriira, waxaa loo gudbinayaa Wasiirka Arrimaha Dibadda oo asagu go'aan ka gaaraya isla markaana soo saaraya ggóaanka lacag-bixinta, ee la xiriira.

Wasiirku waa uu soo saari karaa góaan uu ku diidayo (ka soo-horjeeda) soo-jeedimaha Guddiga: haseyeeshe, asagu wuxuu mar kasta awoodaa in uu dokumentiyada dib ugu celiyo Guddiga, haddii uu arko in baaritaanno dheeraad ah loo baahan yahay.

Gáanka Wasiirka waxaa dad daneynaya lagu ogeysiinayaa isla habraaca ku xusan faqradda kowaad.

**Qod. 7**

Magdhawga, marka la joogo Dhulka Jamhuuriyadda Talyaaniga, waxaa lagu bixiyaa lacagta liirada talyaaniga, ah, ayada oo lagu bixinayo amar-bixin oo toos ah amaba, codsiga dadka xaqa u leh magdhowga; Dhulka Soomaaliya gudahiisana, waxaa lagu bixinayaa lacag ah shilin soomaali oo u dhiganta, ayada oo la raacayo habraacyada ku xusan sharciga 3da Maarso 1951, lamba. 193, oo laga bixinayo adeegga khasnadda Dowladda.

Waa arkay Wasiirka Arrimha Dibedda.

**PELLA**